



# Good To Go!™

## SHURUUDAHA IYO XEERARKA QOFKA AAN DIIWAANGASHANEYN OO LEH AKOON

SHURUUDAHA IYO XEERARKAAN DHEERAADKA AH, OO AY LA SOCDAAN SHURUUDAHA IYO XEERARKA AASAASIGA AH, NOOCA 5 AAD EE DIB LOO EEGAY 6/2021, WAXAY QAYB KA YIHIIN WAAXDA GAADIIDKA GOBALKA WASHINGTON (WSDOT) HESHIISKA MACMIILKA ("HESHIISKA") EE GOOD TO GO! ee LA GAARAY IYO AY GALEEN UNA DHAXEYEA "MACMIILKA") IYO WSDOT GOOD TO GO! XARUNTA ADEEGGA MACMIILKA ("XARUNTA ADEEGGA MACMIILKA") SIDA KU XUSAN SHARCIIYADA GOBALKA WASHINGTON. MAJIRTO WAX KU QORAN HESHIISKA OO KAA DHAAFAYA, MACMIIL KA AHAAN, GANAAXYADA KA DHASHA U HOGAANSANAAN LAAANTA SHARCIIYADA IYO XEERARKA GOBALKA.

### Nooca 5 aad ee Dib u eegista lagu sameeyay 6/2021

Haddii aad iska diiwaangelinayo akoonka aan diiwaangashaneyn **Good To Go!** sida ku xusan heshiiskan, waxaa lagugu dabaqi doonaa Shuruudahaan iyo Xeerarkan soo socda:

- A. Xogta gaarka ah iyo xogta qoyska looma baahna mana lagu kaydin doono xarunta adeegga macmiilka. Hase yeeshee, haddii aad jeclaan lahayd inaad akoonka oonleen ku isticmaasho ama inaad bayaanka baanka ku hesho iimayl ayadoon wax lacag ah lagaa qaad, waxaa loo baahan yahay ciwaan iimayl.
  - i. Bayaanada baanka ee warqadaha ah waxaa laga heli karaa xarumaha adeegga macmiilka ee **Good To Go!** si loo daabacdo ayadoo 50 senti la iskaga qaadaayo halkii bogga (lacagta ugu yar oo uu qofku bixin karana waa \$1.50 halkii bayaan).
- B. Akoonada aan diiwaangashanayn waa in lagu daraa dookha lacag bixinta Hordhaca ah. Lacag buuxinta tooska ah, kaarka lacagta kaashka, jeega elektarooniga ah (Automated Clearing House, ACH) ayaa lagu kaydin karaa faylka.
- C. Nooc kasta oo lacag celin ah looma qoondayn doono Akoontada aan diiwaangashanayn oo ay ku jirto marka la xiraayo akoonada ay kujirto lacagaha haraadiga ah.
- D. Akoonada aan diiwaangashaneyn waxaa si toos ah dib loogu buuxin karaa ayadoo la adeegsanaayo boosto, taleefoon, oonleen ama xarumaha adeegga macmiilka ee **Good To Go!** ayuu qofku si toos ah u imaan karaa.
  - i. Lacagaha lagu bixiyo jeega waa inay si waadix ah u muujinayaan lambarka akoonka **Good To Go!** ama lambarka diiwaanka lacag bixinta si lacagta loogu shubo akoonkaaga.
- E. Haddii lacagta boonada gaariga aan la bixin, lagu bixiyo Bayaan Boosto iyo/ama Ogeysiiska Ganaaxa Madaniga ah (Notice of Civil Penalty, NOCP) ayaa diri doonaa qofka Ku diiwaangashan Gaariga ayadoo lagu daraayo lacaga khuseeya iyo kharashka ka dhasha daahinta lacag bixinta.
- F. Akoonada aan diiwaangashanayn ee aan lahayn wax khalad ah waxaa laga dhigi karaa akoon ah **Good To Go!** oo leh dookha Lacag bixinta Hordhaca ah ama dookha lacag bixinta Lagu saleeyo Cadadka Lacagta la isticmaalay.
  - i. Lacaga soo galaaya waxaa loo wareejin doonaa akoonka loo wareejiyay akoonkiin hore.
- G. Qofka leh akoon aan diiwaangashanayn waxaa la siin doonaa oggolaansho uu ku isticmaalaayo akoonkiisa asagoo adeegsanaaya webka ama Nidaamka Taleefoonka ee la adeegsado codka (Interactive Voice Response, IVR), wuxuuna qaadi karaa tallaabooyinkan soo socda:
  - i. Wuxuu eegi karaa xogta iyo taariikhda akoonka
  - ii. Wuxuu soo degsan karaa bayaanada akoonka
  - iii. Wuxuu sameyn sameyn karaa lacag bixin toos ah
  - iv. Wuxuu bixin karaa ciwaan iimayl si uu u helo bayaanada akoonka
  - v. Wuxuu akoonka aan diiwaangashanayn ee caadiga ah ka dhigi karaan akoon ah **Good To Go!** oo leh dookha Lacag bixinta Hordhaca ah ama dookha lacag bixinta Lagu saleeyo Cadadka Lacagta la isticmaalay
- H. Akoonada Aan Diiwaangashanayn uma qalmaan Barnaamijka Xalka Macmiilka (Customer Program for Resolution, CPR).
  - i. FIIRO GAAR AH: Barnaamijka CPR barnaamij qofka hal mar looga cafiinaayo kharashaadka Ganaaxa Madaniga ah iyo Haaditaanka bixinta Lacagta haddii lacaga boonoyinka la bixiyo waqtiga la codsanaayo CPR.
- I. Maadaama akoonku yahay midaan diiwaangashanayn, aysana jirin xog shaqsiyadeed oo lagu kaydiyay, haddii akoonku uusan shaqeyn muddo dhan sideed iyo toban (18) billood oo isku xigga, macmiilka LOOMA diri doono ogeysiiska akoonka ee sheegaya Xirnaanshaha akoonka.
- J. Haddii akoonka aan diiwaangashanayn uu sii xirnaado muddo dhan labaatan iyo afar (24) billood oo isku xigga ayna lacago kusii jiraan akoonka, akoonka waa la xiri doonaa mana la sameyn doono wax lacag celin ah.

**Sharciga VI ee Ogeysiiska Dadwaynaha** Siyaasada Waaxda Gaadiidka Gobalka Washington (Washington State Department of Transportation's, WSDOT) ayaa dhigaysa inaan qofna, ayadoo la eegaayo qowmiyadiisa, midabkiisa, dalka uu kasoo jeedo, ama jinsiga uu yahay, sida ku xusan Sharciga VI ee Xaquuqaha Dadwaynaha ee soo baxay 1964, inaan laga reebin ka qayb galka, loona diidin gunnooyinka, ama inaan lagula kicin wax takoor ah oo ka dhan ah barnaamijka iyo hawlaha federaalka maalgeliyo. Qof kasta oo aaminsan in xaquuqiisa Sharciga VI lagu tuntay, wuxuu cabasho usoo gudbin karaa Xafiiska Fursadaha Sinnaanta (Office of Equal Opportunity, OEO) ee WSDOT. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka loo gudbiyo cabashada Sharciga VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibbaadyada takoor la'aanta, fadlan kala xiriir Iskuduwaha Sharciga VI ee OEO adoo kala xariiraya (360) 705-7082.

**Xogta Xeerka Dadka Naafada ah ee Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA)** Xogtaan oo qaab kale u qoran ayaa la heli karaa kadib marka iimayl loo diro kooxda Kaladuwanaanshaha/Arrimah ADA ayadoo lagala xariirayo wsdotada@wsdot.wa.gov ama laga wacaayo lambarka bilaashka ah ee 855-362-4ADA (4232). Shaqsiyaadka dhagoolayaasha ah ama maqalku ku adag yahay waxay sameyn karaan codsi ayagoo wacaaya Washington State Relay oo ah 711.